



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8aad	Kulanka: 4aad
Taariikhda: Sep 07, 2026	Goobta fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu furmay: 11:22 AM	Saacadda uu xirmay: 1:04 PM
Shir guddoonka fadhiga: Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare	Guntanka Kulanka: 29 Senator
Martida Kulanka: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Badroolka iyo Khayraadka Macdanta ee DFS Mudane Cabdiwahaab Cabdi Cumar oo uu weheliyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Badroolka iyo Khayraadka Macdanta ee DFS Mudane Maxamed Xaashi Carabay.	Ajandayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta Labaad Hinse Sharciyeedka Macdanta Jamhuuriyaad Federaalka Soomaaliya

Furitaanka Kulanka:

Senator Xasan Xuseen Xaaji ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 28 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Khayraadka Qaranka, Kaabeyaasha Dhaqaalaha iyo Gaadiidka, Senatar Seynab Ismaaciil Maxamed, si ay Golaha uga horjeediso warbixin ku saabsan akhrinta labaad ee Hindise-sharciyeedka Macdanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Warbixinta kaddib, 13 Senatar ayaa ka dooday akhrinta labaad ee hindise-sharciyeedka, iyagoo su'aalo ka weydiiyey Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Batroolka iyo Khayraadka Macdanta ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Intaas kaddib, Wasiir Ku-xigeenka ayaa ka jawaabay dhammaan su'aalihii ay Xubnaha Golaha Aqalka Sare ka weydiiyeen hindise-sharciyeedka Macdanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa faray Guddiga Khayraadka Qaranka, Kaabeyaasha Dhaqaalaha iyo Gaadiidka in ay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii, Shirgudoonka Shirka Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **1:04 PM**.

DHAMAAD